



Hagayaasha Caawinta Lacagta ee Rec Plus iyo Preschool

Waa maxay Caawimaadda Khidmada?

Barnaamijka Caawimaadda Khidmada ee Guddiga Madadaalada iyo Beeraha Nasashada ee Minneapolis ayaa caawiya dadka deggan Minneapolis marka ay dhacaan dhibaatooyin/caqabado dhaqaale. Helitaanka Rec Plus ama Preschool waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la raacayo Hagayaasha Dakhliga ee hadda jira, buuxinta codsiga, iyo lifaaqida dukumentiyada loo baahan yahay. Ka-bixitaanka dhammaan iyo nuska lacagaha waa kaliya qaybta hoggaanka ee khidmadaha oo kaliya, mana aha agabka, khidmadaha dheeraadka ah, ama kharashka gelitaanka safarrada dhulka.

Kumaa codsan kara? Dadka deggan magaalada Minneapolis ee keena wax caddeynaya in ay magaalada deggan yihiin ayaa xaq u leh Barnaamijka Caawimaadda Khidmada Madadaalada. Caddeynta degganaanshaha waa in la siiyaa Guddiga Madadaalada iyo Beeraha Nasashada ee Minneapolis marka la codsanayo caawimaadda khidmada.

Waa maxay tallaabooyinka la qaado si loo codsado? Buuxi foomka codsiga Barnaamijka Caawimaadda Khidmada ka-dibna bixi dukumentiyada ka hor inta aadan iska diiwaangelin fasalka. Codsiyada iyo dukumentiyada aan dhanneyn waa la joojin doonnaa oo lagama baraandegi doonno ilaa dhammaan laga dhammeystiro. Ku soo-celi codsiga oo buuxa iyo dukumentiyada kasta oo loo baahan yahay goobta halka fasalka lagu bixinayo.

Dokumentiyada noocaha ah ayaa loo baahan yahay?

Dokumentiyada codsiga marka laga soo tago dukumentiyadan soo socda ayaa loo baahan yahay; fadlan calaamadee sanduuqa kuwa aad ku soo lifaaqeyso. Fadlan ka xannib dhammaan lambarrada Social Security-yada waalidiinta iyo kuwa tiirsan dhammaan dukumentiyada ka hor inta aan la lifaaqin.

- Nuqulka gummudyada laba ka mid ah jeeggaga mushaarka ee ugu dambeeyay ee dhammaan kuwa dakhliga soo gala ee reerka oo la socda lambarka SS# oo la qariyey ama
- Nuqulka canshuur celinnadaada federaalka ee sannadkii hore oo la socda lambarka SS# oo la qariyey ama
- Haddii aadan dakhli lahayn ama aadan gudbin canshuuraha dakhliga, ku soo lifaaq qoraal sharxaya in aadan dakhli lahayn.

Goormee ayaan oggaan doonnaa haddii la i aqbaley? Xaq-u-yeelashada ayaa la go'aamin doonnaa oo lagu soo xaqiijin doonnaa toban maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka la helo codsiga. Soo gudbinta codsiga ma ahan xaqiijinta caawimaadda khidmada ama diiwaangelinta koorsada. Waxaa laguugu soo wargelin doonnaa telefoon ahaan, iimayl, ama boostadda haddii ay jiraan macluumaad dheeraad ah oo loo baahan yahay si looga baraandego codsigaaga. Su'aalo weyddiinta ku saabsan codsiga caawimaadda khidmada ama foomamka diiwaangelinta waa in loo soo gudbiyaa Xarunta Madadaalada ee halka aad u gudbisay foomamka.

Miyaa la ilaalin doonnaa sirta dhammaan macluumaakeyga?

Dhammaan macluumaadka loo gudbiyey Barnaamijka Caawimaadda Khidmada iyadoo ujeeddadu tahay go'aaminta xaq-u-yeelashada waa sir.

Intee in le'eg ayaan isticmaali karaa caawimaadda haddii la ii oggolaado?

Caawimaaddan waxay u wanaagsan tahay sannad kaalandarka loo codsadey. Waa in aad dib-u-codsataa sannad kaalandar kasta. Caawimaaddan cid kale looma wareejin karo.

Macluumaadka Lacag-bixinta

Haddii lagu oggolaado Barnaamijka Caawimaadda Khidmada, waxaad u baahan doontaa in aad bixiso khidmada oo wax laga dhimey waqtiga diiwaangelinta waxqabadka haddii la adeegsan karo. Haddii sabab kastaba haku timaadee ay xisaabtaada noqoto mid shin dhammeysatay caawimaadda khidmadaada ayaad lumin doontaa.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraada ah

Ka wac Adeegga Macmiilka ee Guddiga Madadaalada iyo Beerta Nasashada ee Minneapolis (Minneapolis Park and Recreation Board Customer Service) Lambarka 612-230-6400



Codsiga Caawimaadda Khidmada

Madaxa Qoyska:	Taleefoonka
Cinwaanka Waddada	Magaalada <i>Minneapolis</i>
Ciwaanka Iimaylka	Calaamadee habka xiriirka ee aad doorbideyso <input type="checkbox"/> Iimayl <input type="checkbox"/> Taleefoon <input type="checkbox"/> Boostada U.S.
Xarunta Madadaalada ee Codsiga Helaya	Calaamadee waxa caawimaadda khidmada loogu talagalay <input type="checkbox"/> Barnaamijka Daryeelka Carruurta ee Rec Plus <input type="checkbox"/> Barnaamijka Preschool
Magaca waxqabadka aad rabto in aad isku diiwaangeliso:	Waa maxay khidmada waxqabadka?

Iyadoo la raacayo Xeerka Hab-dhaqannada Xogta Dowladda ee Minnesota, shaqaalaha madadaalada ee Guddiga Madadaalada iyo Beeraha Nasashada ee Minneapolis ayaa halkan kugu wargelinaya in macluumaadka shakhsiyeed ee aan kaa codsaneyno iyo/ama carruurtaada ee ku xusan foomkan in loo tixgelinayo mid gaar ah. Xogta gaarka ah waxaa loo heli karaa adiga iyo shaqaalaha Guddiga Madadaalada iyo Beerta Nasashada ee Minneapolis ee u baahan in ay helaan macluumaadka si loo maamulo barnaamijka – ee ma ahan dadweynaha.

Buuxi shaxda oo kuddar dhammaan xubnaha qoyska ee kugu tiirsan ee guriga ku nool.

Magaca Koowaad iyo Magaca Dambe	Da'da – haddii uu ka yar yahay 18 sano

- Qor dakhliga guud ee sannadlaha ee qoyska (dakhliga ka hor canshuuraha). Kuddar dhammaan dakhliga hadda (shaqada, hawlgabka, Damaannada Bulshada, taageerada carruurta, masruufka iwm.) \$ _
- Ku soo lifaaq nuqullada xaqiijinta dakhliga.

Saxiixa: Waxaan caddeynayaa in macluumaadka xagga sare ku xusan in uu yahay mid run ah oo sax ah iyo in dhammaan dakhliga laga warbixiyo. Waxaan fahamsanahay in macluumaadkan si bilaash ah la ii siiyey maadaama aan qaadaneyo caawimaadda khidmada ee MPRB. Waxaan fahamsanahay in hawladeennada MPRB ay xaqiijin karaan macluumaadkan iyo in fasiraadda khaldan ee sida ula-kaca ah loo sameeyay ay keeni karto baajinta ka-dhaafidda khidmada iyo diiwaangelinta. Waxaan fahamsanahay in mas'uuliyaddaydu tahay inaan ka qariyo Lambarka Social Security-ga ee aan leeyahay iyo lambarrada Social Security-yada kuwa igu tiirsan ka hor inta aan soo gudbin xaqiijintayda.

**ISTICMAALKA
XAFIISKA OO
KELIYA**

Taariikhda La Helay _____/_____/_____
Degenaanshaha La Caddeeyay _____

Calaamadee: ___ Soo-jeedinta ah in la aqbalo ka-dhaafid buuxda ___ Soo-jeedinta ah in la aqbalo ka-dhaafid nus ah
_____ La diidey iyadoo lagu saleynayo dakhliga _____ La diidey iyadoo lagu saleynayo xaqiijin la'aan _____ La
diidey iyadoo lagu saleynayo foomka aan dhammeystirnayn Saxiixa Hawlwadeenka _____ Taariikhda _____/_____/_____
_____ Goobta _____

Saxiixa Maareeyaha MPRB _____ Taariikhda _____/_____/_____

Taariikhda La Diidey _____ Taariikhda La Aqbaley _____ Taariikhda La Cusbooneysiiyey _____